

Charité | KVZ | Augustenburger Platz 1 | 13353 Berlin

Ku socota waalidka

**Charité - Universitätsmedizin Berlin
Einladungs- und Rückmeldewesen
für Kinder-Früherkennungsuntersuchungen**

Telefon (030) 450 566 022
Fax (030) 450 566 988
E-Mail zentralestelle@charite.de
Internet https://kindervorsorge.charite.de

Berlin, tt.mm.jjjj

Xasuusinta UX ee ilmahaaga Xxxx

Screening-ID: 
000 000 000 000

Waalidka, Masuulka qaaliga ahow,

Horey wax ballan ah ma uga qabsatay UX ee ilmahaaga Xxxx, ama horeyba ma u samaysay arinkan?

Anaga, Xafiiska dhexe ee qaabilsan arimaha casuumaadda iyo talo-bixinta, waxaan aruurinaa xogta la xiriirta ka qaybgalka baaritanada hore ee Baarliin laakiin nasiib darro ma anaan helin wax ogaysiin ah. Tani waxay ku dhici kartaa dhowr sababood dartood:

- Haddii baadhitaanku uu dhacay 10 bari kahor, waxaa laga yaabaa inuu khalad ka jiray dhanka wada-xiriirka u dhexeeya dhakhtarka caruurta ee Baarliin iyo anaga. Haddii ay sidani jirto, fadlan si dhakhso ah noogula soo xiriir telfoon, fakis ama iimayl.
- Haddii baadhista horey loo sameeyay ama haddii aad horey ballan u qabsatay, adiga iyo ilmahaagaba Khayr baan idiin rajaynaynaa sidaas darteedna qoraalku adinka muhiim idiinma aha. Waxaan ku tashanaynaa inaan dhawaan indinka heli doono xaqiijinta baadhitaanka.
- Haddii aysan wali kuu suuragalin inaad ballan qabsato – waxaan ognahay in ilmaha yar ay laba midkood ku dhici doonto - marka fadlan si dhakhso ah ula xiriir dhakhtarkaaga ilmaha si UX ay u dhacdo inta ka horeysa dd.mm.yyyy (taariikhda).

Haddii dhakhtarkaaga ilmaha aan ballan laga qabsan Karin, waxaad warbixin dheeri ah ka heli kartaa websaydkayaga warbixintaasoo ku saabsan dhakhtar helista, sidoo kalana waxaad ka heli kartaa xiriirka meelaha ballamaha gaaban laga qabsan karo.

Waxaa muhiim ah in xilli hore lasii ogaado in koritaanka Xxxx uu yahay mid caadi ah ama in ay jiraan khatar la xiriirtra dhanka koriinka jireed iyo kan maskaxeedba. Daawaynta wanaagsan waxay wax tari kartaa kaliya haddii xili fiican la ogaado waxa jira. Ilaa iyo 2017kii, baadhitaanada (U1- U9) ayaa sidoo kale loo isticmaalayay in lagu ogaado dhibaatooyinka habdhaqanka la xiriira iyo koriinka maskaxeed, maadama tilaabo xili hore la qaado ay ilmahaaga u wanaagsantahay.

Sidaa daraadeed: Xaqiiji in aad isticmaasho soojeedinta ogaanshaha xili hore maadaama ay ilmahaaga faa-iido u leedahay!

Haddii aadan haysan shahaadada kaqaybgalka oo aad ka heshay dhakhtarkaaga caruurta wax yar un kadib marka baadhitaanka la sameeyo, waxaa anaga na-saaran inaan wargalino saraakiisha caafimaadka ee dagmadaada . kadibna waxaa kula so xiriiri doonaa shaqalaaha waxayna kugu soo booqan doonaan guriga oo ay ku siin doonaan talo/taageero haddii loo baahdo. Fadlan ha iloobin in aad noo soo sheegto taariikhda aad isla gartaen, maadaama baadhitaanada la sameeyo ay saamayn ku yeelanayaan habraaca (taariikh la'aan)

Mahadsanid

Kooxdaada xafiiska dhexe ee arimaha casuumaadda iyo talo bixinta ee ogaanshah baadhitaanada ilmaha xili hore